



MCDANIEL

High School

2735 NE 82nd Avenue | Portland, Oregon 97220
(503) 916-5220 | www.pps.net/Mcdaniel



McDaniel High School waa mid ka mid ah dugsiyada sare ee qowmiyadaha kala duwan ee ku yaala gobolka Oregon, taas oo ka dhigaysa nolasha kambaska mid wax kobcisa iyadoo siinaysa ardayda aragtiyo kala duwan maalin walba. Halkan McDaniel, ardaydayada iyo qoysaskayagu waxay ku hadlaan in ka badan 30 luqadood oo lagaga hadlo daafaha dunida kuwaas oo ay ku jiraan Af-soomali, Isbaanish, iyo Fiyatnaamiis. Waxaan ku dedaalnaa inaan abuurno jawi soo dhaweyn leh oo ay ardaydayada cajiibka ahi iskaashi kula sameyn karaan macalimiin xamaasad leh.

Guudmarka McDaniel

Koorsooyinka Meelaynta Sare (AP) waa koorsooyin heer kulliyadeed ah oo la bixiyo inta lagu jiro dugsiyada sare. Koorsooyinkan waxa abuuray barayaasha kulliyada/jaamacada si ay u muujiyaan waxa lagu dhigo fasalada kulliyada ee sannadka koowaad. Tani waa fursad weyn oo aad ku kasban karto buundooyinka kulliyada adiga oo ka gudbaya imtixaanka AP. Koorsooyinka Labada Buundo (Dual Credits) waxay siiyaan ardayda fursad ay ku kasbadaan buundooyinka kulliyada iyo buundooyinka dugsiyada sare isla hal wakhti. McDaniel HS wuxuu bixiyaa koorsooyinka AP ee Cilmiga Deegaanka, Kalkulas AB & BC, Suugaanta iyo Dhaqanka Isbaanishka, Luuqadda iyo Dhaqanka Isbaanishka, Luuqadda iyo Hal-abuurka, Fiisigis, Kimistari, Cilmiga Kombiyuutarka, Juquraafiga Aadanaha, Suugaanta iyo Hal-abuurka, Bayoolaji, Istaatikis, Dawladda, Cilmi-nafsiga, iyo Taariikhda Maraykanka. Marka ay kulliyada buundooyin ku galaan ardaydu waxay awood u yeelan karaan inay ku qalinjebiyaan wakhti kooban ama inay si dhakhso ah u qaataan koorsooyin heer sare ah. McDaniel HS waxa uu bixiyaa koorsooyinka Meelaynta Sare iyo Koorsooyinka Labada Buundo (Dual Credit) iyagoo la kaashanaya Clackamas Community College, Oregon State University, Portland Community College, Portland State University and the University of Oregon.

Bixinta barnaamijka McDaniel CTE waxa ku jira culuum kala duwan oo u saamaxaya ardayda inay helaan barasho gacanta lagu qabanayo oo ay helaan xirfado lagu adeegsan karo shaqooyin badan mustaqbalka. Barnaamijyada CTE waxay siiyaan ardayda dugsiyada sare fasalo heerar sare, khuseeya, oo adag kuwaas oo u diyaariya fursadaha dugsiyada sare ka dambeeya iyo shaqooyinka mushaharka-sare, xirfada-sare, iyo baahida-sare loo qabo Barnaamijyada McDaniel CTE waxa ka mid ah Ganacsiga, Cilmiga Kombiyuutarka, Dhismaha, Naqshadeynta & Farshaxanka, Naqshadeynta Dijitalka ah, Injineerinka, Barayaasha Mustaqbalka, Cilmiga Caafimaadka, iyo Wax Beerida Waarta.

Bayaanka Hiigsiga

Hiigsiga iyo Qiyamka

Halkan McDaniel, dhamaan ardaydu waxay heli doonaan waxbarasho xiise leh oo loo dhan yahay oo ay laf dhabar u yihiin kala duwanaanshiyaha iyo ixtiraamka. Dhamaan ardaydu waxay ka qalinjebin doonaan dugsiyada sare iyagoo lagu kabay xirfadaha muhiimka ah ee lagama maarmaanka u ah guusha tacliinta sare, shaqada, iyo ka qeybqaadashada bulshada.

Xaqiiqaha Ku Saabsan Dugsiyada

Astaanta:

Libaaxyada Buurta

Midabada Dugsiyada:

Casaan, Buluug Cadaatu, Buluu Maaree





Ciyaaraha Fudud iyo Waxqabadyada

McDaniel wuxuu ku dhiirigeliyaa dhamaan ardayda inay ka qeybqaataan ciyaaraha fudud!

Si ay ugu biiraan koox, ardaydu waa inay buuxiyaan shuruudaha tacliinta oo ay diiwaangeliyaan caddeynta baarista jireed ee hadda si ay ugu qalmaan. Foomamka iyo khidmadaha dheeraadka ah ayaa sidoo kale loo baahan yahay in la soo gudbiyo si looga qeybqaato. Baysibool, Kubadda Koleyga, u Raxleynta, Orodka Masaafada Dheer, Qoob ka ciyaarka, Rugbida, Golofta, Kubadda Cagta, Sooftibool, Dabaasha, Tenista, Ciyaaraha Fudud, Kubadda Laliska, iyo Legdinta.



Bandhig Faneedka

Barnaamijka Masraxa ee McDaniel waxa ka go'an inuu noqdo mid ficil ahaan iyo shaqo ahaanba ka qeybqaata sare u qaadida masraxa si uu u noqdo deegaanka iyo metelaada cadaaladda bulsheed ee dunida aan rabno inaan ku noolaano kuna kobacno.

Barnaamijka Muusikada ee McDaniel wuxuu siiyaa ardayda ikhtiyaaro bandhig faneedyo oo kala duwan kuwaas oo ay kamid yihiin: Drumline, Fannaaniinta McDaniel, Kooxda Symphonic, Kooxda Wind, Tiyaatarka oo bilaw iyo dhexdhexaadba ah, Tiyaatarka iyo Jilida - sare, Teknoolajiyadda Tiyaatarka, iyo Kooxda Jazz.



Taageerad a Ardayga

McDaniel waxa uu leeyahay 6 La-taliyayaal Dugsi, 1 Dhakhtarka Cilmi-nafsiga Dugsiga oo Waqti Buuxa ah, 1 Shaqaale Bulsheed, iyo 2 Xirfadlayaasha Caafimaadka Maskaxda ee Aqoonta leh ah.

McDaniel HS waxa uu si wadajir ah ula shaqeeyaa tiro ka mid ah shuraakada bulshada. Shuraakadan waxa ka mid ah College Possible, IRCO (Immigrant and Refugee Community Organization), Jobs 101, Latino Network, Portland State University Trio Programs, iyo Step Up. waxaanay door muhiim ah ka ciyaaraan isku xirka ardaydayada iyo qoysaskooda si ay u awoodaan inay guuleystaan.

